
# Tiibisho/ Qaaxo

Cudurka, daawaynta iyo ka-hortagga



HSC Public Health Agency


# Tiibisho/Qaaxo

Qaaxadu (TB) waa cudur la kala qaado oo sida caadiga ah ku dhaca sambabada, inkastoo uu ku dhici karo meel kasta oo jirka ka mid ah.

Waxa jira ku dhawaad 5,000 oo kiis oo Qaaxo ah gudaha UK sanadkiiba iyadoo ku dhawaad 60 ka mid ah kiisaskaas laga helo Waqooyiga Ireland.

Qaaxada si sahal ah laguma qaado - waa inaad xiriir dhow oo muddo dheer ah la yeelataa qof qaba Qaaxada faafta (tusaale ahaan, inaad hal guri kula nooshahay) - laakiin qof kastaa waa inuu ka warhayaa astaamaha cudurka si ay u raadsadaan daaweyn isla markiiba.

**Qaaxada waxaa lagu daaweeyaa antibiyootig gaar ah oo la qaato ilaa ay kaaga dhamaanayso daaweynta.**



## Sidee ayay Qaaxadu u faaftaa oo ma u badan tahay in la i qaadsiiyo?

Qaaxada waxa kaliya si toos ah looga qaadi karaa qof qaba cudurka TB-da ee faafta isla markaana ku dhacda sambabada ama cunaha. Inkasta oo TB-du ay ku faafto hawada marka dadka cudurka qaba ay qufacaan ama hindhisaan, waxay qaadataa inaad xiriir dhow oo muudo dheer ah la yeelato qof cudurka qaba kahor inta aadan khatar u gelin qaadisteeda.

Qasab ma ahan in qof kasta oo qaba cudurka TB-da sambabada inuu faafiyo cudurka. Haddiiba ay qaadanayaan daawaynta saxda ah, inta badan dadka cudurka qaaday waxay si dhakhso leh u noqdaan kuwa aan faafin karin cudurka - guud ahaan kadib laba toddobaad

Iyadoo qof kasta uu qaadi karo TB-da, dadka qaarkood ayaa halis dheeraad ah ugu jira inay qaadaan cudurka marka loo barbardhigo kuwa kale. Waxaana ka mid ah dadka:

- ku noolaa hal guri - ama xiriir dhow la lahaa qof qaba cudurka qaaxada faafta;
- ku nool xaalad caafimaad darro ama ciriiri badan, oo ay ku jiraan dadka guri la'aanta ah ama si xun u seexda;
- ku noolaa, ka soo shaqeeyey ama soo joogey muddo dheer aag ay ku badan tahay Qaaxada;
- laga yaabo in ay u bayla-noqdeen cudurka TB-da markii ay yeraayeen markii uu cudurku ku baahsanaa dalkan;
- ah carruur ay dhaleen waalidiin ka soo jeeda waddan uu cudurka Qaaxada ku badan yahay;
- xabsi ku soo jiray;
- aanan awoodin inay iska caabiyaan caabuqa (habdhiska difaaca jirkoodu uu daciif yahay) sababo la xiriira jirro (tusaale ahaan, HIV) ama daawayn;
- ku tiirsan daroogo ama si xun u isticmaalka khamriga;
- aanan cunto ku filan cunin si ay caafimaad ugu joogaan.

## Sideen ku ogaan karaa haddii aan qaaday cudurka Qaaxada/TB?

Astaamaha ugu caansan ee TB-da waxaa ka mid ah:

- qufac joogto ah oo si tartiib ah u sii xumaada dhowr toddobaad kadib;
- lumita miisaanka/culayska jirka sabab la'aan;
- qandho iyo dhidid badan oo habeenkii ah;
- dareen guud oo daal iyo caafimaad darro ah;
- in la qufaco dhiig.


**Astaamahan oo dhan waxay sidoo kale noqon karaan astaamooyinka cuduro/dhibaatooyin kale. Haddii aad qabto astaamahaas oo aad ka welwelsan tahay, la hadal dhakhtar ama kalkaalisada rugta caafimaadka ama rugta deegaankaaga.**

Haddii aad xiriir dhow la leedahay qof laga helay cudurka qaaxada oo ay jirto khatar ah in aad qaaday caabuqa, waxaa koox takhasuska u leh kugu samayn doona baaritaan.

Qufac muddo dheer ah




Luminta culayska jirka



Qandho



Dhidid habeenkii ah



Daal



Qufac dhiig leh



## Haddii aan qaado cudurka Qaaxada/TB, ma la iga daweyn karaa?

Haa, qaaxada waxa lagu daweyn karaa antibiyootig gaar ah. Marka daaweynta ay bilaabato, waxaad bilaabaysaa inaad dareento caafimaad kadib laba ilaa afar toddobaad laakiin daaweyntu waa inay sii socotaa ugu yaraan lix bilood. Waa muhiim in la dhammaystiro qaadashada dhammaan antibiyootiga si loo daweeyo Qaaxada. Haddii aadan dhamaysanin, infekshanku wuxuu u soo laaban karaa qaab u adkaysan kara daawooyinka caadiga ah wuxuuna noqon karaa mid aad u adag in la daweeyo. Waxaana laga yaabaa inaad qoyskaaga iyo saaxiibadaada u gudbiso caabuqa halista leh ee noocaas ah. **Haddii aan si sax ah loo daweyn tiibayda/qaaxada, waxay sababi kartaa dhimasho.**


## Sidee qaaxada looga hortagi karaa?

Habka ugu muhiimsan uguna waxtarka badan ee looga hortagi karo faafitaanka qaaxada waa in la baaro dadka cudurka qada sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah iyo in la xaqiijiyo in ay si buuxda u dhamaystaan daaweynta saxda ah. Raadraaca xiriirka/isku dhowaanshaha ayaa lagu aqoonsan doonaa dadka aad isugu dhowaaday kuwaas oo ay tahay in sidoo kale la baaro si loo xaqiijiyo in aysan sidoo kale qaadin qaaxada. Xiriirka dhow/isku dhowaanshaha ayaa loola jeedaa dadka xiriir/isku dhowaansho muddo dheer ah la yeeshay qof qaba qaaxada faafta, waxaana inta badan ka mid ah dadka isla nool ama xiriir ka dhexeeya.

**www.nice.org.uk/guidance/ng33**

## Waxaan u maleeyay in qaaxada loogu hortagi karo tallaal qaadasho?

Waxa jira tallaal (BCG) oo la isticmaalayey sannado badan si la iskaga difaaco cudurka qaaxada. Tallaalka BCG wuxuu ka hortagaa noocyada qaaxada ee aadka u daran ee carruurta. Si kastaba ha ahaatee, tallaalka BCG kama hortago qaaxada ee xaalad kasta sidaas darteed waxaad weli u baahan tahay inaad ogaato astaamaha iyo calaamadaha qaaxada.



## Yaa qaadanaya tallaalka BCG?

Marka la joogo UK, si la mid ah wadamo kale oo badan, tallaalka BCG waxaa la siiyaa:

- carruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano oo kuwaas oo marka loo barbardhigo dadweynaha guud u badan inay xiriir dhow la yeeshaan ama u dhowaadaan qof qaba qaaxada, sababtoo ah waxay ku nool yihiin meel ay ku badan tahay qaaxada ama waalidkood ama waalidiinta waalidkood ayaa ka soo jeeda waddan ay ku badan tahay qaaxada;
- carruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano ee aan qabin tiibishada isla markaana xiriir dhow la leh qof qaba qaaxada faafta.

Tallaalku waa lacag la'aan waxaana badanaa la bixiyaa dhalmada kadib ha ahaato isbitaalka ama markaad guriga ku laabato. Tallaalka BCG badanaa laguma taliyo in la siiyo dadka da'doodu ka weyn tahay 16 sano, marka laga reebo haddii khatarta ay ugu jiraan qaadista cudurka ay aad u sarayso. Waxaana ka mid noqon kara shaqaalaha caafimaadka iyo shaybaarada.

## Waxaan u socdaa dibadda, ma u baahanahay in la igu duro tallaalka

Haddii aad ka yar tahay 16 sano jir oo aad in ka badan saddex bilood shaqo ama nolol u aadayso waddan ay ku badan tahay qaaxada, waa muhiim inaad ka difaacan tahay cudurka qaaxada. Talo weydiiso dhakhtarkaaga ama rugta caafimaadka.

## Miyaan tallaalka BCG u codsan karaa naftayda ama carruurtayda?

Keliya shakhsiyaadka ee halis gaar ah ugu jira qaadista cudurka qaaxada ayaa la siin doonaa tallaalka BCG.

# Qaaxada - walaacyada guud

Inta badan dadka ku nool Waqooyiga Ireland weligood lama kulmi doonaan qof qaba cudurka qaaxada. Khatarta ah in uu qofka qaado cudurka qaaxada intuu joogo Waqooyiga Ireland waa mid aad u hooseeysa. Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in dadku ay ka warhayaan astaamaha cudurka qaaxada,
iyo inay ogaadaan sida qaaxada ay u faafto iyo sida loo daweeyo. Waxaa sidoo kale muhiim ah in dadku ay fahmaan khatarta dhabta ah ee cudurku ku leeyahay naftooda iyo qoysaskooda.

## Gaadiidka dadweynaha iyo goobaha dadweynaha ee hawada xiran

Isticmaalka gaadiidka dadweynaha iyo inaad raacdo danahaaga maalmeed kuma gelinayaan khatar dheeraad ah oo ah inaad qaado cudurka qaaxada.



## Qaaxada iyo dugsiyada

Arrintani waa mid aad dhif u ah laakiin waxay sababi kartaa walaac weyn. Carruurta qabta tiibayda si dhif ah ayay u faafiyaan cudurka, ha ahaato markay joogaan guriga ama dugsiyada. Carruurta guud ahaan waxay qaaxada ka qaadaan dadka waaweyn ee qaba qaaxada sambabada. Haddii ilmo dhigta dugsi laga helo cudurka qaaxada, waxaa la baaraa qoyskooda iyo dadka ay xiriirka dhow la leeyihiin. Meesha ay cudurka ka qaadaan badanaa waa xubin qoyska ka tirsan ama qof ay isku guri ku nool yihiin.

Koox kooban xubno badan oo takhasusyo kala duwan leh oo ku takhasusay caafimaadka bulshada iyo cudurrada faafa ayaa dugsiga ku samayn doona qiimeynta khatarta, iyaga oo tixgelinaya nooca qaaxada ee uu qofku qabo iyo sida uu u faafayo. Xaaladaha aan caadiga ahayn ee ah inay jirto khatar weyn oo ah in cudurka ku faafay gudaha dugsiga, Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha iyo HSC Trust ayaa waxay si dhow ula shaqayn doonaan dugsiga si loo ogaado cid kasta oo u bayla noqotay cudurka. Qof kasta oo loo arko inuu halis ku jiro waxaa la weydiin doonaa inuu sameeyo baaritaan, waxaana la diin doonaa daaweyn haddii loo baahdo.

Haddii qof weyn oo shaqaalaha ka mid ah la ogaado inuu qabo cudurka qaaxada ee faafta, markaas carruurta ayaa la baari doonaa iyadoo la raacayo talada hay’ada caafimaadka dadweynaha.

# Macluumaad dheeraad ah

## Waddamada leh heerar sareeya oo cudurka qaaxada ah

Wadamada ay ku badan tahay qaaxada waxaa laga soo xigtaa xogta Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) waxaana laga heli karaa internetka:

**www.gov.uk/government/publications/tuberculosis-tb-by-country-rates-per-100000-people/who-estimates-of-tuberculosis-incidence-by-country-and-territory-2020-accessible-text-version**

## TB Alert

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan inaad naftaada, qoyskaaga iyo asxaabtaada ka ilaaliso cudurka qaaxada, waxaad la hadli kartaa dhakhtarkaaga ama waxaad la xiriiri kartaa TB Alert. TB Alert waa urur samafal oo u heellan wacyagelinta qaaxada iyo la dagaalanka qaaxada ee aduunka oo dhan:

**www.tbalert.org**

22 Tiverton Road
London
NW10 3HL

Iimaylka: **contact@tbalert.org**

## Linkiyo waxtarka leh

**www.nidirect.gov.uk/news/important-recognise-tuberculosis-tb- symptoms-early**

**www.publichealth.hscni.net/directorate-public-health/health-protection/tuberculosis**

HSC Public Health Agency

**Public Health Agency**
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net

Naga raadi

08/23